42. Ee iska dhaaf ha dhumbadeen eh (xumaanta) hana Ciyaareen intay kala kulmaan Maalintoodii Qiyaame ee loogu gooddiyey.

فَذَرْهُمْ يَخُوضُوا وَيَلْعَبُوا حَتَّىٰ يُلَاقُوا يَوْمَهُمُ الَّذِي يُوعَدُونَ ﴿٤٢﴾

43. Maalinta ay ka soo bixi Quburaha iyagoo deg degi ood mooddo inay u laxaadsan Calaamo loo taagay (xaggooda).

يَوْمَ يَخْرُجُونَ مِنَ الْأَجْدَاثِ سِرَاعًا كَأَنَّهُمْ إِلَىٰ نُصُبٍ يُوفِضُونَ ﴿٤٣﴾

44. Aragooduna waa dullaysan yahay Maalintaas, waxaana ka muuqda oo dabooli dulli, Maalintaasuna waa Maalintii loogu yaboohay (Abaal marinteeda).

خَاشِعَةً أَبْصَارُهُمْ تَرْهَقُهُمْ ذِلَّةٌ ۚ ذَٰلِكَ الْيَوْمُ الَّذِي كَانُوا يُوعَدُونَ ﴿٤٤﴾

Waxaa jirtay in xaqdiidayaashii Ree Makaad ay Nabiga ku soo ururi jireen, iyagoo Koox Koox ah oo haddidaad iyo beenin ku dheehan, haddana damci inay wanaag iyo khayr helaan, waxaase wanaag hela Ciddii kasbata, Eebana wuu karaa inuu halaago kuwa dambiilayaasha kuna baddalo kuwa ka khayr badan, hase Ciyaaro oo dambi ha falo ciddii doonta waxay uun la kulmi doontaa Maalinta Abaal marinta ee Dadka la soo bixin Dambiilana Dulli ka muuqdo, waa Maalinta Qiyaame. Al-Macaarij (36-44).

# Suurat Nuux

# سُورَةُ نُوحٍ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَٰنِ الرَّحِيمِ

1. Annagaa Nabi Nuux u dirray Qoomkiisii si uu ugu digo Caddibaadda horteed.

إِنَّا أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِ أَنْ أَنذِرْ قَوْمَكَ مِن قَبْلِ أَن يَأْتِيَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١﴾

2. Wuxuuna ku yidhi Qoomkayow waxaan idiin ahay dige Cad « oo muuqda ».

قَالَ يَا قَوْمِ إِنِّي لَكُمْ نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿٢﴾

3. ee Eebe Caabuda kana dhawrsada’anigana i adeeca.

أَنِ اعْبُدُوا اللَّهَ وَاتَّقُوهُ وَأَطِيعُونِ ﴿٣﴾

4. Wuu idiin dambi dhaafi wuuna idin dib dhigi ilaa muddo Magacaaban, marka Eebe la yimaaddo ajasha wax dib u dhigi ma jiro haddaad wax ogtihiin.

يَغْفِرْ لَكُم مِّن ذُنُوبِكُمْ وَيُؤَخِّرْكُمْ إِلَىٰ أَجَلٍ مُّسَمًّى ۚ إِنَّ أَجَلَ اللَّهِ إِذَا جَاءَ لَا يُؤَخَّرُ ۖ لَوْ كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٤﴾

5. Nabi Nuux wuxuu yiri Eebbow waan u yeeray Qoomkaygii Habeen iyo dharaar.

قَالَ رَبِّ إِنِّي دَعَوْتُ قَوْمِي لَيْلًا وَنَهَارًا ﴿٥﴾

6. Yeedhiddayduna uma siyaadinin waxaan carar ahayn.

فَلَمْ يَزِدْهُمْ دُعَاءِيَ إِلَّا فِرَارًا ﴿٦﴾

7. Markasta oo aan u yeedhana si aad ugu dambi dhaafto waxay farahooda yeelaan dhagahooda, maryahoodana way isku dadaan, wayna ku Madax adaygaan xumaanta wayna is weyneeyaan.

وَإِنِّي كُلَّمَا دَعَوْتُهُمْ لِتَغْفِرَ لَهُمْ جَعَلُوٓا۟ أَصَٰبِعَهُمْ
فِيٓ ءَاذَانِهِمْ وَٱسْتَغْشَوْا۟ ثِيَابَهُمْ وَأَصَرُّوا۟ وَٱسْتَكْبَرُوا۟
ٱسْتِكْبَارًا ﴿٧﴾

8. si kor ah yaan ugu yeedhay, «dadka dhexdiisa».

ثُمَّ إِنِّي دَعَوْتُهُمْ جِهَارًا ﴿٨﴾

9. Waana u qaylyey,hoosna waan ugu yeeray.

ثُمَّ إِنِّيٓ أَعْلَنتُ لَهُمْ وَأَسْرَرْتُ لَهُمْ إِسْرَارًا ﴿٩﴾

10. Waxaana ku idhi Eebihiin dambi dhaaf weydiista waa dambi dhaaf badanee.

فَقُلْتُ ٱسْتَغْفِرُوا۟ رَبَّكُمْ إِنَّهُۥ كَانَ غَفَّارًا ﴿١٠﴾

11. Cirkana Roob badan ha idinka keenee.

يُرْسِلِ ٱلسَّمَآءَ عَلَيْكُم مِّدْرَارًا ﴿١١﴾

12. Hana idiin kordhiyo Xoolo iyo Wiilal iyo Beero hana idiin yeelo Wabi yaal.

وَيُمْدِدْكُم بِأَمْوَٰلٍ وَبَنِينَ وَيَجْعَل
لَّكُمْ جَنَّٰتٍ وَيَجْعَل لَّكُمْ أَنْهَٰرًا ﴿١٢﴾

13. Maxaad leedihiin ood weynida Eebe uga cabsoon weydeen.

مَّا لَكُمْ لَا تَرْجُونَ لِلَّهِ وَقَارًا ﴿١٣﴾

14. Isagoo idin abuuray idinkoo soo maray Xaalado kala duwan.

وَقَدْ خَلَقَكُمْ أَطْوَارًا ﴿١٤﴾

Nabi Nuux wuxuu Eebe u diray Qoomkiisii si uu ugu digo haseyeeshee waa beeniyeen in kasta oo uu si walba ugu yeedhay, habeen iyo dharaar, kor iyo hoos, waxayna ahaayeen kuwa madax adag sida quraanku meela badan ku sheegay, dhagahayna furaysteen,dharkoodii bay isku duuduubeen si ayan xaqa u maqal, inkasta oo Nabigu ugu yeedhay xaqa, Nuux (1-14).

---

15. Miyaydaan arkaynin sida Eebe u Abuuray toddoba Samo oo isdulsaaran.

أَلَمْ تَرَوْا۟ كَيْفَ خَلَقَ ٱللَّهُ سَبْعَ سَمَٰوَٰتٍ طِبَاقًا ﴿١٥﴾

16. Dayaxana uga yeelay Dhexdooda Nuur, qorraxdana ka yeelay siraad.

وَجَعَلَ ٱلْقَمَرَ فِيهِنَّ نُورًا وَجَعَلَ ٱلشَّمْسَ سِرَاجًا ﴿١٦﴾

17. Eebe waa Kan idinka soo Bixiyay Dhulka.

وَٱللَّهُ أَنۢبَتَكُم مِّنَ ٱلۡأَرۡضِ نَبَاتٗا ﴿١٧﴾

18. Haddana idinku Celin doona Dhexdiisa idinkana soo bixindoona.

ثُمَّ يُعِيدُكُمۡ فِيهَا وَيُخۡرِجُكُمۡ إِخۡرَاجٗا ﴿١٨﴾

19. Eebe waa kan Idiinka yeelay Dhulka gogol.

وَٱللَّهُ جَعَلَ لَكُمُ ٱلۡأَرۡضَ بِسَاطٗا ﴿١٩﴾

20. Si aad ugu socotaan Dhexdiisa waddooyin waawayn.

لِّتَسۡلُكُواْ مِنۡهَا سُبُلٗا فِجَاجٗا ﴿٢٠﴾

**waa in dadku Eebe ka yaabo, Eegana siduu u abuuray cirkana dayax nuurahayo iyo qorrax ifaysana ugu yeelay, dadkana dhulka ka soo bixiyay kuna celin doona markay dhintaan'kana soo bixindoona waqtiga abaalmarinta, dhulkana Gogol uga dhigay, waddooyinna uga jeexay ay danahooda ku qabsadaan, Eebaha saas ah yay waajib tahay in kaligii la caabudo,luguna mahadiyo. Nuux (15-20).**

---

21. (Nabi) Nuux wuxuu yidhi Eebow way I caasiyeen waxayna Raaceen kuwo aan xoolohoodu iyo Carrurtoodu waxaan khasaara ahayn u kordhinaynin.

قَالَ نُوحٞ رَّبِّ إِنَّهُمۡ عَصَوۡنِي وَٱتَّبَعُواْ مَن لَّمۡ يَزِدۡهُ
مَالُهُۥ وَوَلَدُهُۥٓ إِلَّا خَسَارٗا ﴿٢١﴾

22. Dhagar waynna way Dhakreen.

وَمَكَرُواْ مَكۡرٗا كُبَّارٗا ﴿٢٢﴾

23. Waxay isu Dheheen ha ka tagina Ilaahyaalkiinna, hana ka Tagina wuddi iyo suwaac iyo yaguuth, iyo Yacuuq iyo Nasri.

وَقَالُواْ لَا تَذَرُنَّ ءَالِهَتَكُمۡ وَلَا تَذَرُنَّ وَدّٗا وَلَا سُوَاعٗا
وَلَا يَغُوثَ وَيَعُوقَ وَنَسۡرٗا ﴿٢٣﴾

24. Waxayna Dhumiyeen dad Badan ee Eebow ha u kordhinnin Daalimiinta waxaan baadi ahayn.

وَقَدۡ أَضَلُّواْ كَثِيرٗاۖ وَلَا تَزِدِ ٱلظَّٰلِمِينَ إِلَّا ضَلَٰلٗا ﴿٢٤﴾

25. Gafkoodii Dartiis yaa loo Maansheeyay Naarna Loo Galiyey, mana helayaan Eebe ka soke gargaare,

مِّمَّا خَطِيٓـَٰٔتِهِمۡ أُغۡرِقُواْ فَأُدۡخِلُواْ نَارٗا فَلَمۡ يَجِدُواْ لَهُم
مِّن دُونِ ٱللَّهِ أَنصَارٗا ﴿٢٥﴾

26. Nuux wuxuu yidhi Eebow ha kaga tagin Dhulka korkiisa Gaalada Ruxna.

وَقَالَ نُوحٞ رَّبِّ لَا تَذَرۡ عَلَى ٱلۡأَرۡضِ مِنَ ٱلۡكَٰفِرِينَ
دَيَّارًا ﴿٢٦﴾

27. Maxaayeelay Hadaad kaga tagto waxay Dhumin Addoomahaaga, mana dhalayaan waxaan gaal xun ahayn.

إِنَّكَ إِن تَذَرۡهُمۡ يُضِلُّواْ عِبَادَكَ وَلَا يَلِدُوٓاْ إِلَّا فَاجِرٗا
كَفَّارٗا ﴿٢٧﴾

28. Eeboow u dambi Dhaaf Aniga iyo waalidiintay iyo ruuxii gala gurigeyga

رَّبِّ ٱغۡفِرۡ لِي وَلِوَٰلِدَيَّ وَلِمَن دَخَلَ بَيۡتِيَ

isagoo Mu'min ah Rag iyo haweenba, hana u kordhinnin Daalimiinta waxaan halaag ahayn.

مُؤْمِنًا وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَٱلْمُؤْمِنَٰتِ وَلَا تَزِدِ ٱلظَّٰلِمِينَ
إِلَّا تَبَارًۢا ﴿٢٨﴾

Qoomkii nabi Nuux way beeniyeen xaqii, wayna caasiyeen, waxayna warkiisa raaceen madaxdoodii xuma taliska ahayd,, waxayna isfareen inayna ka tagin caabudidii ilaahyaalkoodii, dad badanna way dhumiyeen, dambigoodii dartiis yaana biyo loogu halaagay naarna loo galiyay'gargaare Eebe ka soo hadhayna ma ayna helin, markaas nabi Nuux wuu habaaray Eebana waa ka aqbalay, maxaa yeelay waxaan xumaan iyo fasaad ahayn ma ayna falayn, mu'miniintana wuu u duceeyay iyo intii raacdayba rag iyo haween, gaalana halaag yuu Eebe u warsaday. Nabiguna wuxuu yidhi (ha la saaxiibin waxaan mu'min ahayn, quudkaagana yuusan cunin ruuxaan Eebe ka cabsade ahayn). Imaam Axmad-Baa Abii Saciid ka wariyay. Nuux (21-28).

# Suurat Al-Jinn — سُورَةُ الجِنّ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaad Dhahdaa (Nabiyow) waxaa lay waxyooday inay Dhagaysteen Koox Jinni ah (Quraanka) Dheheen waxaan maqallay quraan layaab leh.

قُلْ أُوحِيَ إِلَيَّ أَنَّهُ ٱسْتَمَعَ نَفَرٌ مِّنَ ٱلْجِنِّ فَقَالُوٓا۟ إِنَّا سَمِعْنَا
قُرْءَانًا عَجَبًا ﴿١﴾

2. Oo ku hanuunin xaqa waana Rumaynay waxaan Eebe cibaada la wadaajinhaynana ma jiro.

يَهْدِىٓ إِلَى ٱلرُّشْدِ فَـَٔامَنَّا بِهِۦ ۖ وَلَن نُّشْرِكَ بِرَبِّنَآ أَحَدًا ﴿٢﴾

3. Waxaana Sarreeya sharafta Eebeheen, mana yeelan haweenay iyo ilmo midna.

وَأَنَّهُۥ تَعَٰلَىٰ جَدُّ رَبِّنَا مَا ٱتَّخَذَ صَٰحِبَةً وَلَا وَلَدًا ﴿٣﴾

4. Waxay Ahaayeen kuwannagii xumaa inay ku dhahaan hadallo xadgudub ah Eebe.

وَأَنَّهُۥ كَانَ يَقُولُ سَفِيهُنَا عَلَى ٱللَّهِ شَطَطًا ﴿٤﴾

5. Waxaana u Malaynaynay inuusan insi iyo Jinni Midna Eebe ku beensheegaynin.

وَأَنَّا ظَنَنَّآ أَن لَّن تَقُولَ ٱلْإِنسُ وَٱلْجِنُّ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا ﴿٥﴾

6. Waxayna ahaayeen kuwo insiga ka mid ah inay Magangalaan kuwo Jinniga ka mida markaasna u kordhiyeen kibir (iyo xad Gudub).

وَأَنَّهُۥ كَانَ رِجَالٌ مِّنَ ٱلْإِنسِ يَعُوذُونَ بِرِجَالٍ
مِّنَ ٱلْجِنِّ فَزَادُوهُمْ رَهَقًا ﴿٦﴾